MaineHealth

# Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta

**Ogeysiiskani wuxuu sifeynayaa sida macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan loo isticmaali karo loona shaacin karo iyo sida aad ku heli karto macluumaadkani.**

**FADLAN SI TAXADAR LEH DIB UGU EEG.**

## XUQUUQDAADA

▶ *Eeg BOGGAGA 2 & 3 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaan iyo sida loo adeegsado.*

**Waxaad xaq u leedahay inaad:**

- Hesho nuqulka diiwaankaaga caafimaad ee warqadda ah ama elektaroonigga ah
- Saxdo diiwaankaaga caafimaad ee warqadda ah ama elektarooniga ah
- Codsato wadaxiriir qarsoodi ah
- Naga codsato inaan xaddidno macluumaadka aan wadaagno
- Hesho liiska cidda aan la wadaagnay macluumaadkaaga
- Hesho nuqulka ogeysiiskan asturnaanta
- Dooro qof ku matala
- Soo gudbiso cabasho haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada asturnaanta la jebiyey

## DOOQYADAADA

▶ *Eeg BOGGAGA 3 & 4 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xulashooyinkan iyo sida loo adeegsado.*

**Waxaad haysataa dooqyada qaar oo khuseeya sida aan u isticmaalno una wadaagno macluumaadka marka aan:**

- U sheegayno qoyskaaga iyo asxaabtaada xaaladdaada
- Bixinayno gargaar musiibo
- Kugu darayno diiwaanka isbitaalka
- Bixinayno daryeelka caafimaadka maskaxda ama isticmaalka maandooriyaha
- Suuqgeynayno adeegyadayada oo iibinayno macluumaadkaaga
- Lacag uruurinayno
- La wadaagayno macluumaadka isku-duwidda daryeelka
- Bixinayno adeegyada loogu talagalay bukaanada aan qaangaarin ee ka yar 18 sano jir

## ISTICMAALKAYAGA & SHAACINTAYADA

▶ *Eeg BOGGAGA 5,6 & 7 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegsiyadani iyo shaacinadaan.*

**Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno oo aan wadaagno macluumaadkaaga marka aan:**

- Ku daaweynayno
- Kugu soo dalacayno lacagaha adeegyadaada
- Qabanayno hawlaha ururkayaga
- Isku-dubarida daryeelka iyo lacagaha la samaynayno qolyo kale
- Gacan ka geysanayno dadweynaha iyo arrimaha badqabka
- Bixinayno gargaar musiibo
- Ka qaybqaadanayno Isweydaarsiyada Macluumaadka Caafimaadka
- Adeegsanayno AI (caqliga macmalka ah) iyo tiknoolojiyada wax duubista
- Samaynayno cilmi-baaris iyo waxbarasho
- U hoggaansamayno sharciga
- Ka jawaabayno codsiyada ku deeqida xubnaha iyo unugyada jirka
- La hawlgalayno baaraha caafimaadka ama agaasimaha aaska
- Jawaab-celin ka bixinayno codsiyada magdhowga shaqaalaha, hay'adaha fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawladda
- Jawaab-celin ka bixinayno dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga ah

MaineHealth

## XUQUUQDAADA

**Marka ay timaado macluumaadkaaga caafimaad, waxaad leedahay xuquuq gaar ah.**

Qeybtani waxay sharraxaysaa qaar ka mid ah xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadaha innaga kaa saaran.

**Hel nuqulka diiwaankaaga caafimaad**

- Waxaad codsan kartaa inaad aragto ama hesho nuqulka elektaroonigga ah ama warqad ah oo diiwaankaaga caafimaad iyo macluumaadka kale ee caafimaad ee aan kaa hayno. Eeg macluumaadka xiriirka ee ku jira Diiwaanka Caafimaadka ku yaala bogga ugu dambeeya.
- Waxaan ku siin doonnaa nuqul ama soo-koobista macluumaadkaaga caafimaad iyada oo aan la samayn dib u dhac aan macquul ahayn, badanaa 30 maalmood gudahooda kadib codsigaaga. Waxaa laga yaabaa inaan kaa qaadno khidmad macquul ah, oo lagu saleeyay khidmadda.
- Waxaan raaci doonnaa xeerarka federaalka iyo kuwa gobolka ee naga doonaya inaan ku siino marin u helid iyada oo aan la samayn dib u dhac aan macquul ahayn, oo waafaqsan xeerarka wada hawlgelidda Xafiiska Isuduwaha Qaranka ee Tiknoolajiyada Macluumaadka Caafimaadka (“ONC”) iyo Xarumaha Adeegyada Medicare & Medicaid (“CMS”).
- Macluumaadkaaga caafimaad ayaad wakhti kasta ka heli kartaa degelkayaga bukaanka sugan, MyChart. Na weydiiso sida arrintani loo sameeyo.

**Na weydiiso inaan saxno diiwaankaaga caafimaad**

- Waxaad naga codsan kartaa inaan saxno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ee aad u malaynayso inuu khaldan yahay ama aanu dhammaystirnayn. Eeg macluumaadka xiriirka ee ku jira Diiwaanka Caafimaadka ku yaala bogga ugu dambeeya.
- Waxaa laga yaabaa inaan “diidno” codsigaaga, laakiin qoraal ahaan ayaan kuugu soo sheegi doonaa sababta 60 maalmood gudahooda. Haddii la diido, dib-u-eegis cusub ayaad codsan kartaa oo uu sameeyo xirfadle kale.

**Codso wadaxiriir qarsoodi ah**

- Waxaad naga codsan kartaa inaan kuula soo xiriirno si gaar ah (tusaale ahaan, telefoonka guriga ama xafiiska) ama inaan warqad kuugu soo dirno cinwaan kale.
- Codsiyada macquulka ah oo dhan waan “aqbali” doonnaa.

**Na weydiiso inaan xaddidno waxa aan isticmaalno ama wadaagno**

- Waxaad naga codsan kartaa in aynu isticmaalin ama aynu wadaagin macluumaadka caafimaadka qaarkood ee khuseeya daaweynta, lacag-bixinta, ama hawlgalladayada. Looma baahna inaan ku raacno codsigaaga, waxaana laga yaabaa inaan “diidno.”
- Haddii aad si buuxda jeebkaaga uga bixiso adeeg ama shay daryeel caafimaad, waxaad naga codsan kartaa inaan macluumaadkaasi ula wadaagin caymiskaaga caafimaadka ujeeddada lacag-bixin awgeed ama hawlgalladayada awgeed. Waxaanu dhihi doonaa “haa” ilaa inuu sharcigu nooga baahan yahay mooyaane inaan wadaagno macluumaadkaasi.

**Hel liiska cidda aan la wadaagnay macluumaadka**

- Waxaad codsan kartaa liiska (xisaabta) waqtiyada aan wadaagnay macluumaadkaaga caafimaadka lix sano kahor taariikhda aad codsatay, cidda aan la wadaagnay, iyo sababta aan ula wadaagnay.
- Waxaan soo raacin doonnaa dhammaan shaacinada marka laga reebo kuwa ku saabsan daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlgallada daryeelka caafimaadka, iyo shaacinada kale qaarkood (sida mid kasta oo aad codsatay).
- Waxaan u bixin doonnaa hal xisaab sannadkiiba si bilaash ah laakiin waxaan kaa qaadi doonnaa khidmad macquul ah oo lagu saleeyay khidmadda haddii aad mid kale codsato 12 bilood gudahooda. Eeg macluumaadka xiriirka ee ku jira Diiwaanka Caafimaadka ee ku yaala bogga ugu dambeeya.

## XUQUUQDAADA (SII SOCDA)

| | |
|---|---|
| **Hesho nuqulka ogeysiiskan asturnaanta** | • Waxaad codsan kartaa nuqul warqad ah oo ogeysiiskani ah wakhti kasta, xitaa haddii aad oggolaatay inaad ogeysiiskani u hesho si elektaroonik ah. |
| **Dooro qof ku matala** | • Haddii aad qof siisay awood qareen caafimaad ama haddii qof uu yahay mas'uulkaaga sharciga ah, qofkaasi wuxuu adeegsan karaa xuquuqdaada oo wuxuu samayn karaa dooqyo ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad.<br>• Waxaan hubin doonnaa in qofku uu leeyahay awooddani oo uu adeegsan karo kahor inta aynu wax u qaban. |
| **Gudbi cabasho haddii aad dareento in xuquuqdaada la jebiyay** | • Waad caban kartaa haddii aad dareento inaan ku xadgudubnay xuquuqdaada adigoo nala soo xiriiraya oo adeegsanaya macluumaadka ku yaala bogga ugu dambeeya.<br>• Cabasho ayaad Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka ugu gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah adigoo wacaya 1-877-696-6775, booqanaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints ama u diraya warqad:<br>**Office for Civil Rights**<br>200 Independence Avenue, S.W.,<br>Washington, D.C. 20201<br>• Kaama aargoosan doono haddii aad dacwad soo gudbiso. |

## DOOQYADAADA

**Wixii macluumaad caafimaad oo gaar ah, waxaad noo sheegi kartaa dooqyadaada khuseeya waxa aaynu wadaagi karno.**

Haddii aad si cad u doorbideyso sida aynu u wadaagi karno macluumaadkaaga marka ay jiraan xaaladaha hoos ku xusan, nagala hadal. Noo sheeg waxa aad rabto inaan sameyno, annaguna waxaan raaci doonnaa tilmaamahaaga.

| | |
|---|---|
| **Markan oo kale, waxaad xaq iyo dooq u leedahay inaad noo sheegto in aynu:** | • La wadaagno macluumaadka qoyskaaga, asxaabta kuu dhow, ama kuwa kale ee ku lugta leh daryeelkaaga<br>• Wadaagno macluumaadka marka ay jirto xaalad musiibo ah<br>• Ku darno macluumaadkaaga diiwaanka isbitaalka<br>• Haddii aad isbitaal ku jirto, waxaa laga yaabaa inaan ku darno diiwaanka isbitaalka macluumaad gaar ah oo adiga kugu saabsan. Tani ayaa loo samaynayaa si qoyskaaga, asxaabtaada, wadaadadaada, iyo dadweynaha ay kuugu soo booqdaan isbitaalka oo ay guud ahaan u ogaadaan sida aad tahay. Waxaad xaq u leedahay inaad ka hortimaado in macluumaadkaaga lagu daro diiwaanka.<br>• Haddii aadan awoodin inaad noo sheegto doorbidaadaada, waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga haddii aan aaminsanahay inay dantaadu ku jirto. Sidoo kale waxaa laga yaabaa inaan wadaagno macluumaadkaaga marka loo baahdo si loo yareeyo khatar halis ah oo soo socota oo ku soo fool leh caafimaadka ama badqabka. |

## DOOQYADAADA (SII SOCDA)

| | |
|---|---|
| **Markan oo kale, marnaba ma wadaagno macluumaadkaaga ilaa aad naga siiso oggolaansho qoraal ah:** | • Inta badan wadaagida qoraallada daaweynta maskaxda<br>• Iibinta macluumaadkaaga<br>• Ujeeddooyinka suuqgeynta<br>*Haddii suuqgeyntu ay ku lug leedahay lacag-bixin ama magdhow, waxaan kuugu sheegi doonnaa oggolaanshaha dhexdiisa.* |
| **Marka laga hadlayo uruurinta lacagaha:** | • Waxaa laga yaabaa inaan kuula soo xiriirno dadaallo lacag uruurin, laakiin waxaad noo sheegi kartaa in aynu mar dambe kula soo xiriirin.<br>• Xiriir kasta waxaa ku jiri doona dooqyo cad oo aad ku diidi karto waana sharfi doonnaa dooqaaga. |
| **Adeegyada loo helo ka qayb ahaan barnaamijka cilladaha isticmaalka maandooriyaha ee la ilaaliyo ("SUD"):** | • Ma wadaagi karno macluumaadkaaga daaweynta SUD ilaa aan ka helno oggolaanshahaaga.<br>• Dacwadaha madaniga ah, kuwa dembiyada, maamulka, ama dacwadaha sharciyeed awgood ma wadaagi karno macluumaadkaaga SUD ilaa aan ka helno oggolaanshahaaga gaarka ah, amar maxkamadeed, ama sida sharcigu oggol yahay.<br>• Waxaad hal mar na siin kartaa oggolaansho si aan u wadaagno macluumaadkaaga SUD ee loogu talagalay baahiyaha mustaqbalka sida daaweynta, lacag-bixinta, ama hawlaha daryeelka caafimaadka. Uma baahnid inaad saxiixdo mar kasta.<br>• Waad joojin kartaa oggolaanshahaaga wakhti kasta.<br>• Waxaad codsan kartaa liiska shaacinada aan samaynay markaan helnay oggolaanshahaaga. |
| **Marka laga hadlo adeegyada caafimaadka dhimirka iyo baaritaanka HIV:** | • Waxaa jira ilaalino dheeraad ah oo khuseeya macluumaadka daaweynta caafimaadka dhimirka iyo natiijooyinka baaritaanka HIV.<br>• Waxaan heli doonnaa oggolaanshahaaga qoran marka sharcigu u baahdo kahor inta aynu wadaagin diiwaannadan. |
| **Marka laga hadlo isku-duwidda daryeelka:** | • Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga la wadaagno Qolyaha Isweydaarsada Macluumaadka Caafimaadka, sida Maine's Health InfoNet ("HIN").<br>• Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga ka dhigno mid diyaar ah iyadoo loo marayo is-weydaarsiyo kale oo elektaroonig ah oo aan la sameyno bixiyeyaasha aan ahayn kuwa MaineHealth ee ku daaweynaya. (sida Care Everywhere; TEFCA)<br>• Waxaad xaq u leedahay inaad ka baxdo in macluumaadkaaga la wadaago iyadoo loo marayo is-weydaarsiyadaan. Haddii aad doorato inaad ka baxdo, macluumaadkaaga wali waxaa laga yaabaa in loo wadaago qaabab kala duwan (tusaale ahaan, warqad ama fakis ahaan). Na weydiiso sida aad uga bixi karto.<br>• Ka-bixista HIN ayaa sidoo kale laga samayn karaa barta hinfonet.org ama iyadoo la wacayo 866-592-4352. |
| **Marka laga hadlo daryeelka qarsoodiga ah ee loogu talagalay bukaanada aan qaangaarka ahayn:** | • Mararka qaarkood, sharciga Maine iyo New Hampshire wuxuu carruurta aan qaangaarin siinayaa xuquuq qarsoodi oo loogu talagalay noocyada daryeelka qaarkood, sida adeegyada la xiriira caafimaadka dhimirka, caafimaadka galmada, ama cilladaha isticmaalka maandooriyaha. Taasi macnaheedu waa marka la dabaqi karo sharciyadani lama wadaagi karno macluumaadkani waalidiinta ama mas'uuliyiinta.<br>• Waxaan ixtiraami doonnaa xuquuqahaani sida uu sharcigu qabo marka bukaanku codsado. |

## ISTICMAALKAYAGA & SHAACINTAYADA

**Sideen caadiyan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad?**

Caadi ahaan waxaan macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaalnaa ama u wadaagnaa qaababka soo socda.

| | |
|---|---|
| **Ku daaweynayno** | • Waxaan isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaad oo aan la wadaagi karnaa xirfadlayaasha kale ee ku daaweynaya.<br>*Tusaale: Dhakhtar kaa daweynaya dhaawaca ayaa dhakhtar kale weydiin kara xaaladda caafimaadkaaga guud.*<br>• Waxaan u oggolaanaynaa oo keliya dadka isticmaala ee idman inay helaan macluumaadka caafimaadka ee xasaasiga ah ee ku jira diiwaankaaga caafimaadka (sida liiska dhibaatooyinka, liiska daawooyinka, aagaga ogaanshaha xaaladda iyo xasaasiyadda). Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkan ku darno dukumeentiyada daryeelka joogtada ah ee aan siino bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka.<br>• Waxaan wadaagi doonnaa oo keliya macluumaadka caafimaadka ee xasaasiga ah (sida macluumaadka caafimaadka dhimirka qaarkood, qoraallada SUD, HIV iyo baaritaanka hidde-sidaha) marka sharcigu noo oggolaado oo aad na siiso oggolaanshahaaga marka loo baahdo. |
| **Kugu soo dalacayno lacagaha adeegyadaada** | • Waxaan isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan biil u soo dallacno oo aan lacag uga helno qorshayaasha caafimaadka ama hay'adaha kale.<br>*Tusaale: Waxaan macluumaadka adiga kugu saabsan siinaa qorshahaaga caymiska caafimaadka si uu u bixiyo kharashka adeegyadaada.*<br>• Waxaa laga yaabaa inaan kuula soo xiriirno wax ku saabsan caymiska caafimaadka iyo hababka kale ee lacag-bixinta. |
| **Qabanayno hawlaha ururkayaga** | • Waxaan isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan u socodsiino hawlaha xaruntayada, si aan u horumarinno tayada daryeelka, iyo barida howlaha hay'adaha, waxaana laga yaabaa inaan kula soo xiriirno marka loo baahdo.<br>*Tusaale: Waxaan u isticmaalnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan si aan u maareyno daaweyntaada iyo adeegyadaada.* |
| **Isuduwid la samee shaqsiyadaadka ku lugta leh daryeelkaaga ama bixinta lacagaha daryelkaaga** | • Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadka caafimaadka la wadaagno qoyskaaga, asxaabta kuu dhow, ama dadka kale ee ku lugta leh daryeelkaaga ama bixinta lacagta daryeelkaaga ujeeddooyin isku-dubarid awgeed.<br>*Tusaale: Dhakhtarkaagu wuxuu kala hadlaa qorshahaaga daawada daryeele kugu caawiya guriga dhexdiisa.* |

**Sidee kale ayaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka?**

Waxaa naloo oggol yahay ama la nooga baahan yahay inaan macluumaadkaaga u wadaagno qaabab kale — badanaa qaabab gacan ka geysanaya wanaagga dadweynaha, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi-baarista. Waa inaan buuxinaa shuruudo badan oo sharcigu dhigayo kahor inta aan macluumaadkaaga u wadaagin ujeeddooyinkan awgood.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg:** www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html

## ISTICMAALKAYAGA & SHAACINTAYADA (SII SOCDA)

| | |
|---|---|
| **Gacan ka geysanayno dadweynaha iyo arrimaha badqabka** | Waxaan wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadkaaga marka ay jiraan xaaladaha qaarkood sida:<br>• Kahortagga cudurka<br>• Ka caawinta dib-u-soo-celinta alaabta<br>• Soo sheegidda falcelinta xun ee daawada, tallaallada, iyo tallaallada<br>• Amniga Qaranka<br>• Soo sheegidda xadgudub la tuhunsan yahay, dayacaad, ama rabshad qoyseed<br>• Kahortagga ama yaraynta khatar halis ah oo ku soo fool leh caafimaadka ama badqabka qof kasta |
| **Dadaallada Samata-bixinta Musiibooyinka** | • Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaadka la wadaagno hay'ad gacan ka geysata dadaalka gurmadka musiibooyinka si dadka kale loogu wargeliyo xaaladdaada, arrintaada iyo goobtaada |
| **Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka** | • MaineHealth waxay ka qayb qaadataa isweydaarsiyada macluumaadka caafimaadka ee Maine (“HIE”), kaasoo loo yaqaan Health InfoNet (“HIN”).<br>• Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaadka la wadaagno HIE, sida sharcigu oggol yahay, si bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee ku sugan xarumaha kala duwan ay u helaan macluumaadka ay u baahan yihiin si ay kuu daaweeyaan. |
| **TEFCA (Qaabdhismeedka Isweydaarsiga Lagu Kalsoon Yahay iyo Heshiiska Guud)** | • MaineHealth si ammaan ah ayay ula wadaagtaa macluumaadka caafimaadka iyadoo loo marayo is-weydaarsiyada macluumaadka ee la ansixiyay sida TEFCA.<br>• TEFCA waxay ka caawisaa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, hay'adaha caafimaadka dadweynaha, iyo shirkadaha caymiska inay si fudud u wadaagaan macluumaadka si loo horumariyo daryeelka bukaanka, caafimaadka dadweynaha, helitaanka daryeelka caafimaadka, iyo tayada daryeelka.<br>• Shuruucda asturnaanta iyo xuquuqdaada HIPPA waxay khuseeyaan TEFCA iyo shabakadaha lala wadaago macluumaadka. |
| **Caqliga Macmalka ah (“AI”) iyo Tiknoolajiyada Wax Duubista** | • Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno AI iyo teknoolojiyada wax duubista (oo ay ku jiraan maqalka, muuqaalka, iyo sawirrada xasilloon) marka sharcigu noo oggolaado, sida daaweynta, lacag-bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka.<br>• Qalabkani waxaa loo isticmaalaa oo keliya ujeeddooyinka uu HIPAA oggolaaday mana beddelaan shuruudaha oggolaanshaha ama xuquuqda bukaanka. |
| **Danwadaagta Ganacsi** | • Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadka adiga ku saabsan la wadaagno danwadaagta ganacsi, kuwaasi oo looga baahan yahay inay ilaaliyaan macluumaadkaaga oo ay u hoggaansamaan HIPAA. |

## ISTICMAALKAYAGA & SHAACINTAYADA (SII SOCDA)

| | |
|---|---|
| **Cilmi-baarista iyo Waxbarashada** | • Waxaan u isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadkaaga iyo noocyada bayoolojiga (sida dhiigga, unugyada, xubnaha) ee aan lagugu aqoonsan karin (aan ka saarnay macluumaad kasta oo lagugu aqoonsan karo) oo loogu talagalay ujeeddooyin cilmi-baaris caafimaad iyo waxbarasho awgood.<br>• Haddii cilmi-baaristu ay ku lug leedahay macluumaad caafimaad oo ku aqoonsan kara, waxaan heli doonnaa oggolaanshahaaga ama waxaan hubin doonnaa in la buuxiyo oggolaanshaha Guddiga Dib-u-eegista Hay'adda iyo shuruudaha ka-dhaafitaanka HIPAA. |
| **U hoggaansamayno sharciga** | • Waxaan wadaagi doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii sharciyadda gobolka ama federaalku ay nooga baahdaan, oo ay ku jiraan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay rabto inay aragto inaan u hoggaansannahay sharciga asturnaanta federaalka. |
| **Ka jawaabayno codsiyada ku deeqida xubnaha iyo unugyada jirka** | • Waxaan macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan la wadaagi karnaa ururrada soo iibiya xubnaha. |
| **La shaqee baaraha caafimaadka ama dhakhtarka meydka** | • Waxaan macluumaadka caafimaadka la wadaagi karnaa baarayaasha meydka, baarayaasha caafimaadka, agaasimaha aaska iyo dadka kale ee ku lugta leh aqoonsiga, maaraynta, gaadiidka, ama dejinta haraadiga aadanaha, ama si ay u gutaan waajibaadkooda sharciga ah, marka qofku dhinto. |
| **Magdhawga shaqaalaha, hay'adaha fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawladda** | Waxaan isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan:<br>• Wixii ku saabsan qaansheegashooyinka magdhowga shaqaalaha<br>• Ujeeddooyin sharci fulineed ama sarkaal sharci fulineed awgood<br>• Hay'adaha kormeerka caafimaadka ee hawlaha uu sharcigu oggol yahay<br>• Hawlaha gaarka ah ee dawladda sida militariga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha |
| **Jawaab-celin ka bixinayno dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga ah** | • Waxaan wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan annagoo ka jawaabayna amar maxkamadeed ama maamul, ama annagoo ka jawaabayna yeeritaan maxkamadeed. |

## MAS'UULIYADAHAYAGA

- Sharcigu wuxuu na farayaa inaan ilaalino asturnaanta iyo amniga macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo.
- Waa inaan raacnaa dhaqamada asturnaanta ee lagu sharraxay ogeysiiskani oo nuqul ayaan ku siin doonaa.
- Waxaan isticmaalnaa oo shaacinaa oo keliya qaddarka ugu yar ee macluumaadkaaga caafimaad ee lagama maarmaanka u ah shaqadayada, sida uu sharcigu qabo.
- Waxaan kuu sheegi doonnaa si dhakhso ah haddii jabsasho ay dhacdo oo laga yaabo inay wax u dhinto asturnaanta ama amniga macluumaadkaaga, iyadoo la raacayo jadwalka sharciga federaalka iyo shuruudaha macluumaadka. Waxaan sameynaa qiimeynta khatarta waxaana bixinaa ogeysiis shaqsiyeed iyo ogeysiisyo warbaahineed iyo ogeysiinada HHS marka la dabaqi karo.
- Marka aan wadaagayno diiwaanadaada cilladaha isticmaalka maandooriyaha ("SUD") oo aan oggolaansho kaa haysano, waxaan raacin doonnaa ogeysiis sheegaya in macluumaadka aan lala wadaagi karin qof kale ilaa sharcigu oggolaado. Waxaan kuu sheegi doonnaa jabsashada macluumaadkaaga SUD sida uu HIPAA nooga baahan yahay.
- Macluumaadkaaga ma isticmaali doono ama ma wadaagi doonno marka laga reebo sida halkani lagu sharraxay ilaa aad noogu sheegto inaan awoodno si qoraal ahaan ah. Haddii aad noo sheegto inaan awoodno, waad beddeli kartaa go'aankaaga wakhti kasta, marka laga reebo tallaabo kasta oo aan horay u qaadnay ee lagu saleeyay oggolaanshahaaga. Qoraal ahaan noogu sheeg haddii aad beddesho ra'yigaaga.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg:** www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html

## ISBEDDELLADA LAGU SAMEEYAY SHURUUDAHA OGEYSIISKANI

Waan beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskani, isbeddelladuna waxay khuseyn doonaan dhammaan macluumaadka aan kaa hayno. Haddii aan wax ka beddelno Ogeysiiskani, waxaan ka dhigi doonnaa mid laga heli karo xarumahayaga waxaana Ogeysiiska la saxay soo gelin doonaa mareegtayada: www.mainehealth.org/patients-visitors/patient-rights-privacy

## NALA SOO XIDHIIDH

**MaineHealth**
**MaineHealth Privacy Office**
One Riverfront Plaza
Westbrook, ME 04092
207-PRIVACY | 207-774-8229

**NorDX**
**Privacy Officer**
301A U.S. Route 1
Scarborough, ME 04074
1-800-773-5814

**Home Health and Hospice**
**Privacy Officer**
15 Industrial Park Road
Saco, ME 04072
1-800-660-4867 | 207-284-4566

## SI AAD U HESHO CODSIYADA DIIWAANADA CAAFIMAADKA

**Health Information Management Department**

Isniinta ilaa Jimcaha
7:30 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo.

Telefoonka: 207-662-2211 | Fakiska: 207-761-3092
Iimaylka: recordrequests@mainehealth.org

www.mainehealth.org/patients-visitors/medical-records

*Laga bilaabo Febraayo 16, 2026*

MaineHealth

ASL Sign Language Interpreter

# 1-888-879-1120

# Welcome!

We provide interpreter services at no cost to the patient. If you need an interpreter, please let staff know or call us at the phone number shown.

| | | | |
|---|---|---|---|
| *Arabic*<br>العربية | نقدم خدمات الترجمة الفورية دون أي تكلفة على المريض. إذا كنت بحاجة إلى مترجم فوري، فيُرجى إبلاغ فريق العمل أو الاتصال بنا على رقم الهاتف المذكور. | *Chinese (Cantonese)*<br>中文（粵語） | 我們為患者提供口譯服務，相關費用由我方負擔。如果您需要口譯人員，請告知工作人員，或撥打顯示的電話號碼與我們聯絡。 |
| *Chinese (Mandarin)*<br>中文（普通话） | 我们为患者提供口译服务，患者无需承担相关费用。如果您需要口译员，请告知工作人员或拨打所示电话号码联系我们。 | *Dari*<br>دری | اگر ضرورت به ترجمان دارید، لطفاً به کارمندان خبر بدهید یا ذریعهٔ نمبر تلیفون نشان داده شده، با ما به تماس شوید. |
| *French*<br>Français | Nous prenons en charge les frais de services d'interprétation pour les patients. Si vous avez besoin d'un(e) interprète, veuillez en informer le personnel ou nous appeler au numéro de téléphone indiqué. | *Khmer*<br>ខ្មែរ | យើងផ្តល់សេវាអ្នកបកប្រែដល់អ្នកជំងឺ។ ប្រសិនបើអ្នកត្រូវការអ្នកបកប្រែ សូមប្រាប់បុគ្គលិកឱ្យដឹង ឬទូរស័ព្ទមកយើងតាមលេខទូរស័ព្ទដែលបានបង្ហាញ។ |
| *Kinyarwanda*<br>Ikinyarwanda | Duha umurwayi serivise z'ubusemuzi nta kiguzi atanze. Niba ukeneye umusemuzi, bimenyeshe umukozi cyangwa uduhamagare kuri nomero ya terefone yagaragajwe. | *Lingala*<br>Lingála | Topesaka lisungi ya misala ya lobongoli maloba pona mutu ya maladi. Soki ozali na mposa ya mobongoli maloba, yebisa mosali to benga biso na nimero ya telefone oyo topesi. |
| *Pashto*<br>پښتو | موږ ناروغ ته د ژباړونکي خدمتونه چمتو کوو. که تاسو یو ژباړونکي ته اړتیا لرئ، نو مهرباني وکړئ کارکوونکي خبر کړئ یا موږ ته په څرګنده شوې تلیفون شمېره زنګ ووهئ. | *Portuguese*<br>Português | Fornecemos serviços de intérprete sem qualquer custo para o paciente. Se precisar de um intérprete, informe a equipa ou ligue-nos para o número de telefone indicado. |
| *Russian*<br>Русский | Мы предоставляем услуги устного переводчика для пациента. Если Вам нужен устный переводчик, сообщите об этом персоналу или позвоните нам по указанному номеру телефона. | *Somali*<br>Soomaali | Waxaan bixinnaa adeegyada turjumaanka annagoo aan wax kharash ah ka qaadin bukaanka. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan u sheeg shaqaalaha ama naga soo wac lambarka taleefanka ee muuqda. |
| *Spanish*<br>Español | Proporcionamos servicios de interpretación sin costo para el paciente. Si necesita un intérprete, comuníquese con el personal o llámenos al número de teléfono indicado. | *Swahili*<br>Kiswahili | Tunatoa huduma za mkalimani bila gharama kwa mgonjwa. Ikiwa unahitaji mkalimani, tafadhali wajulishe wahudumu au tupigie simu kwa nambari iliyoonyeshwa. |
| *Vietnamese*<br>Tiếng Việt | Chúng tôi cung cấp dịch vụ phiên dịch cho bệnh nhân mà không mất phí. Nếu bạn cần phiên dịch, vui lòng cho nhân viên biết hoặc gọi cho chúng tôi theo số điện thoại hiển thị. | | |

MaineHealth